



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Tilmaamaha Farshaxanka Dhallinyarada 2025

Macluumaadka Deeqaha Fanka Dhallinyarada

Farshaxanka Dhallinyarada wuxuu bixiyaa barnaamijka farshaxanka 2-sano ee ardayda dugsiyada dhexe iyo sare ee Seattle si ay u helaan fursado badan oo farshaxan iyo dhaqameed. Barnaamijyadani waxay dhacaan wakhti ka baxsan saacadaha dugsiya waxaana hogaamiya macalimiinta farshaxanka. Waxaan rabnaa inaan aburno fursado badan oo loogu talagalay dhallinyarada ka kala yimid dhaqamo kala duwan oo jinsiyado iyo dhaqan-dhaqaale leh si ay ugu xirmaan farshaxanka.

Daraasaduhu waxay muujinayaan in dhallinyaradu aanay isku mid ahayn inay helaan waxbarasho faneed sababo la xiriira jinsiyaddooda, dakhligooda, luqaddooda lagaga hadlo guriga, iyo baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah. Xafiiska Fanka & Dhaqanka Seattle waxaa ka go'an sinnaanta iyada oo loo marayo Barnaamijkeeda Hal-abuurka Dhallinyarada.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin codsashada, hubinta haddii aad u qalanto, ama isticmaalka nidaamka khadka, la xiriir Kristi Woo, Maamulaha Mashruuca Horumarinta Dhallinyarada, kristi.woo@seattle.gov ama 206-727-8671.

Waxaan haysanaa turjubaano ku gula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Nasoo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan ka helayno turjumaan si uu ugu soo biiro wicitaanka.

Codsiga

Ka codso khadka iyada oo loo marayo bog-khadka deeqda ee Magaalada Seattle:

https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo codsiga, fadlan soo wac ama iimayl u dir Maareeyaha Mashruuca Kristi Woo 206-727-8671 ama kristi.woo@seattle.gov.

Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa Talaado, Maarso 4, 2025, 5 galabnimo Waqtiga Pacific

Codsiyada la soo gudbiyo ka dib wakhtiga kama dambaysta ah ee 5 galabnimo lama aqbali doono.

U-qalmitaanka/Shuruudaha

- Mashaariicdaadu waa inay dhacaan inta u dhaxaysa Sebtembar 2025 - Agoosto 2027. (wakhti laba sano ah)
- Codsadayaasha u qalma waxaa ka mid ah fannaaniinta shaqsiya ah, fanaaniinta wax bara, ururada fanka iyo dhaqanka, wakaaladaha adeegga dhalinyarada, iyo kulliyadaha.
- Barnaamijyadaadu waa inay diyaar u ahaadaan ardayda dugsiyada dhexe iyo sare waana inay ka dhacaan xadka magaalada Seattle. Kala hadal maamulaha mashruuca haddii aad su'aalo qabto.
- Ciwaankaagu waxaa laga yaabaa inuu ka baxsan yahay xadka magaalada Seattle.
- Dhammaan fannaaniinta iyo macallimiinta wax bara ee ay shaqaaleysiinayaan deeq-helayaasha waa inay lahaadaan ugu yaraan **hal (1) sano oo** waayo-aragnimo ah la shaqaynta ardayda dugsiyada dhexe iyo sare iyo mashaariicda farshaxanka gaarka ah.
- Mashaariicdaadu waa inay ka turjumaan mudnaansiinta Farshaxanka Dhalinyarada iyo taageeridda mujtamaca dhalinyarada sida kor lagu sharaxay.

Maalgelinta

- Haddii la doorto, waxaad heli doontaa wadar dhan **\$12,000** oo taageero maaliyadeed ah oo la qaybiyey laba (2) sano oo barnaamij ah: \$6,000 gudaha 2025-2026 iyo \$6,000 gudaha 2026-2027.
- Waxa kaliya oo aad heli doontaa lacagta ka dib marka barnaamijku bilowdo. Marka aad gudbiso qaansheegta, waxaad lacagta ku heli doontaa 30 maalmood oo shaqo gudahood. Jeega ayaa si toos ah loogu soo diri doonaa ciwaanka lagu tilmaamay qaansheegta. (Cinwaankani waa inuu u dhigmaa ciwaanka ku taxan W9 kaaga.) Ma jirto doorasho lacag-ku-shubis toos ah.

Lacagaha waxaa loo isticmaali karaa:

- Lacagaha fanaaniinta
- Gunnada dhalinyaradu
- Suuqgeynta iyo kharashaadka xayeysiinta
- Maamulka mashruuca iyo kharashaadka shaqaalaha
- Alaabta
- Meesha banaan
- Kiraynta qalabka
- Kharashyada la xiriira barnaamijka
- Kharashyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la oggolaado ka **hor** ogolaanshaha maamulaha mashruuca deeqdayada

Lacagaha looma isticmaali karo:

- Hawlaha dugsiya dhexdiisa
- Wax kasta oo ka mid ah mashruuca la soo jeediyay ee la dhammeeyay ka hor intaan lacagta la bixin
- libka qalabka ama software

- Dhammaadka dhacdooyinka ama hadiyadaha
- Dhacdooyinka lacag ururinta, ama adeegyada diinta

Haddii lagu abaalmariyo, maareeyaha mashruuca ayaa hubin doona isticmaalka lacagaha Magaalada inay waafaqsan yihiin siyaasadaha Magaalada.

Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Kaalay wax badan ka baro deeqdaan iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican.

Casharka 1-aad ee Warfaafinta

Khamiis, Janaayo 30, 2025, 12 - 1 galabnimo

[ISDIIWAAN-GELIN](#)

Casharka 2-aad ee Warfaafinta

Talaado, Febraayo 4, 2025, 5 - 6 galabnimo

[ISDIIWAAN-GELIN](#)

Casharka 1 dib u eegista qabyada ah

Arbacada, Febraayo 12, 5 - 6 galabnimo

[ISDIIWAAN-GELIN](#)

Casharka 2-aad ee dib u eegista qabyada ah

Talaado, Febraayo 18, 12 - 1 galabnimo

[ISDIIWAAN-GELIN](#)